Casharka 43

1. Sidee baa Ilaah u ciqaabay tobankii qabiil ee degganaa woqooyiga Israa'iil?
-Ilaah wuxuu iyaga u soo diray reer Ashruur si ay u qabsadaan tobanka qabiil ee Israa'iil, oo dabadeetana addoommo uga dhigtaan.

2. Kaddib markii Ilaah ciqaabay tobankii qabiil ee Israa'iil, sidee baa Ilaah u ciqaabay labadii qabiil ee Yahuudiya degganaa?
-Ilaah wuxuu iyaga u soo diray reer Baabuloon inay qabsadaan labada qabiil ee reer Yahuudah si ay uga dhigtaan addoommo.

3. Sidee bay reer Baabuloon ku burburiyeen caasimaddii Yeruusaalem?
-Macbudka ayey markii hore gubeen.
-Waxay kaloo gubeen Yeruusaalem oo dhan.
-Waxaanay dudumiyeen derbiyadii magaalada ku wareegsa-naa oo dhan.

4. Maxaa dadka reer Yahuudah ay sameeyeen markii ay ku laabteen Yeruusaalem?
-Waxay dib u dhiseen macbudka.
-Waxay kaloo dib u dhiseen caasimadda Yeruusaalem.
-Waxay kaloo dib u dhiseenderbiyadii ku xeernaa caasimadda Yeruusaalem.

5. Dadkii reer Yahuudah arkii ay Yeruusaalem ku soo laabeen waxaa loo bixiyey magac cusub. Muxuu ahaa magacaas?
-Yuhuud.

6. Maxaa la oran jiray qoomiyadihii Ilaah u soo diray inay



qabsadaan dadka Yuhuudda ah?
-Giriig iyo reer Rooma.

7. Reer Rooma yey caabudi jireen?
-Waxay caabudi jireen asnaamta.
-Waxay kaloo caabudi jireen boqorkoodii la oran jiray kaysar.

8. Yey ahaayeen Culimada?
-Culimadu waxay ahaayeen madaxdii Yuhuudda oo qori jirtay Hadallada Ilaah.

9. Farrisiintuna yey ahaayeen?
-Farrisiintu waxay ahaayeen Madaxdii Yuhuudda oo waxay dadka bari jireen Hadallada Ilaah.

10. Saddukiintuna yey ahaayeen?
-Sadukiintu waxay ahaayeen hoggaamiyayaashii diinta ee hodanka ahaa oo macbudka ilaain jirtay.

11. Maxaa la yiraahdaa Sunagoogada?
-Waa aqallada ay Yuhuudd ku kulmi jireen halkaasoo ay ku akhrisan jireen oo kaga hadli jireen Qoraalladii Muuse.

12. Wakhtigaas, miyuu jiray qof Yuhuudi ah oo rumaysnaa Ilaah?
-Haa, laakiin aad bay u yaraayeen.
-Ilaah wuxuu u soo diray nebiyo aad u badan si ay Yuhuudda ula hadlaan.

-Qaar ka mid ah nebiyada Ilaah u soo diray Yuhuudda wuxuu ahaa Malakii.

-Malakii wuxuu Yuhuudda u sheegay inaanu illaawin iyaga, oo uu

u soo diri doono Badbaadiye.

- Kaddib makrii Malakii dhintay, Ilaah lama uusan hadlin reer binu Israa'iil, ilaa iyo muddo 400 oo sannadood ah.

-Marka haddaba badanaa Yuhuudd ayan rumaynin Ilaah, ayaa qaar ka mid ahi waxay sugayeen in Ilaah soo diro Badbaadiyaha.

-Laba ka mid ah Yuhuudda oo iyagu Ilaah sugayey intuu ka soo dirayo Badbaadiyaha ayaa waxaa la kala oran iray Sekariyah iyo xaaskiisii Elisabeet.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:5-6

5-Wakhtigii Herodos ahaa boqorkii Yhauudiya, waaa jiray wadaad la odhan jiray Sakariyas, oo ka mid ahaa safkii Abiya; haweenaydiisuna waxay ka mid ahayd hablihii reer Haaruun, maaceedana waxaa la odhan jiray Elisabet.
6-Labadooduba xaq bay ku ahaayeen Ilaah horiisa, oo qaynuunnadii iyo xukummadii Rabbiga ayay eedla'aan ku socon jireen.

-Sekaryaah wuxuu ahaa wadaad, oo isaga iyo Xaaskiisa Elisabeetna waxay rumaysnaayeen Ilaah.

-Laakiin Sekaryaah iyo xaaskiisa dhib ayaa haystay.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:7

7-Ilma ma aya lahayn, waayo Elisabet madhalays bay ahayd, oo labadooduba way da'weynaayeen.



-Haddaba maxay ahayd dhibaatadii Sekaryaah iyo Elisabeet haysatay?

-Waayo Elisabeet madhalays bay ahayd.
-Waayo Sekaryaah iyo Elisabeet labaduba way gaboobeen.

-Sekaryaah wuxuu ahaa wadaad, oo hawshiisuna waxay ahayd inuu ka dhex adeego macbudka Yeruusaalem.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:8-10

8-Waxaa dhacay, intuu shuqulkii wadaadnimadii safkiisa dartiis samaynayay Ilaah hortiisa,
9-sida caadadii wadaaddnimadu u ahayd, in shuqulkiisu ahaa inuu foox shido goortuu macbudka Rabbiga galay.
10-Saacaddii fooxa ayaa dadkii badnaa oo dhammu dibadda ku tukanayeen.

-Maxaa kud hacay Sakaryaah markii uu macbudka ku jiray?

-Waxaa u muuqday Sakaryaah malagga Rabbiga.

Bal anyu akhrinno Luukos 1:11-14

11-Markaasaa waxaa isaga u soo muuqatay malaa'igtii Rabbiga oo taagnayd meeshii fooxa lagu shido midigteeda.
12-Goortuu Sakariyas arkay ayuu naxay, wuuna cabsaday.
13-Laakiin malaa'igtii baa ku tidhi, Ha baqin, Sakariyasow, waayo, baryadaadii waa la maqlay; afadaada Elisabeetna wiil bay kuu dhali doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa Yooxanaa.
14-Waxaad heli doontaa farxad iyo raynrayn; dad badanna dhalashadiisa ayay ku farxi doonaan.

-Maxaa malaggu ku yidhi Sakaryas?

-Malaggu wuxuu ku yiri Ilaah baa Sakaryaah siinaya wiil, oo magaciisana waxaa loo bixin doonaa Yooxanaa.

-Maxaa haddaba malaggu ka leeyahay wiilka Ilaah siinayo Sekaryaah?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:15-17

15-Waayo, Rabbiga hortiisa nin weyn buu ku ahaan doonaa, mana cabbi doono khamri ama wax lagu sakhraamo. Waxaana xataa uurka hooyadiis kaga buuxsami doona Ruux aQodduuskaa.
16-Reer bini Israa'iil badidoodana ayuu Rabbiga Ilaahooda ah ku soo jeedin doonaa.
17-Isaguna wuxuu ku hor mari doonaa ruuxii iyo xooggii Eliyaas inuu aabbayaasha qalbiyadooda ku soo jeediyo carruurta, iyo inuu caasiyiinta ku soo celiyo xigmadda kuwa xaqa ah, inuu Rabbiga u diyaargareeyo dad hagaagsan.

-Waxaa Malaggu leeyahay wiilka Sekeryas, oo ah Yooxanaa Baabtiisaha, wuxuu dadka u diyaargarayn doonaa imaanshaha Badbaadiyaha.

-Muxuu malagu ugu yeery Badbadiyaha imanaya?
-Sayid.

-Wa kuma Sayidku?
-Ilaah.

-Malagga wuxuu leeyahay imanaya Waa Rabbi qudhiisu, waayo



waa wiilkii Ilaah.

-Wixii intaas ka dambeeyey, Sekaryaah xaaskiisa Elisabeet way uuraysatay oo shan bilood.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:24-25

24-Maalmahaas dabadeed afadiisa Elisabet ayaa uuraysay, oo shan bilood ayay is-qarisay iyadoo leh,
25-Sidaasaa Rabbigu iigu sameeyey maalmihii uu i eegay inuu ceebtayda dadka dhexdooda iiga qaado.

-Wixii intaas ka dambeeyey, Ilaah wuxuu u soo diray malag bigraddii Maryama ahayd.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:26-31

26-Bishii lixaad Ilaah baa malaa'ig Jibriil u soo diray magaalada Galilii oo Naasaret la dodhan jiray,
27-ilaa gabadh bikrad ah oo u doonanayd nin la odhan jiray Yuusuf oo dhashii Daa'uud ahaa; gabadhana waxaa la oran jiray Maryan.
28-Malaa'igtii baa u soo gashay, oo waxay ku tidhi, Nabad, adigoo nimcaysan, Rabbiga ayaa kula jira,
29-Markaasay hadalkii ka naxday, oo waxay isku tidhi, Maxay tahay salaantan?
30- Malaa'igtii baa ku tidhi, Ha bain, Maryamay, waayo, nimco ayaad Ilaah ka heshay.
31-Dadkuna waxay sugayeen Sakariyas, oo waxay la yaabeen siduu macbudka ugu raagay.

-Maxaa Malaggu u sheegay maryama?

-Waxaa malaggu u sheegay maryama in Ilaah iyada u doortay inay ku curato Masiixii dunida iman lahaa.

-Miyaa Ilaah illoobay ballankiisii ahaa inuu soo diro Badbaadiyaha?

-Maya.

-Maxaa Ilaah u xusuusanayaa Ballankiisii ahaa inuu soo diri doono Badbaadiyaha?

-Waayo Ilaah wuxuu jecel yahay dadkiisa oo dhan.

-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inuu dadka oodhan ka badbaadiyo dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.

-Maxaa Ilaah u doortay Maryama?

-Miyaana Maryama ahayn carruurtii Aadan iyo Xaawo?
-Haa.

-Miyaanay Maryama ku dhalanin dembi sida dadka kale?
-Haa.

-Maxaa Ilaah u doortay Maryama?

-Waayo maryama waxay rumaysnayd Ilaah.

-Waayo Maryama waxay sugaysay in Ilaah soo diro Badbaadiyaha.

-Muxuu ahaa magaca wiilka Maryama?



-Ciise.

-Muxuu ka macne yahay magaca Ciise?

-Magaca Ciise wuxuu ka macne yahay Badbaadiye ama Bixiye.

-Maxaa kale ee Malaggu ka leeyahay ama ka sii sheegay Wiilkii Maryama, oo ahaa Badbaadiyaha?

Bal aynu akhrinno Luukas 1:32a

32-Nin weyn buu ahaan doonaa, waxaana loogu yeedhi doonaa Wiilka Kan ugu sarreeya,

-Waxaa malaggu leeyahay Maryama wiilkeeda wuxuu noqon doonaa Wiilka Ilaaha ugu sarreeya.

-Muxuu haddaba malaggu ka hadlayaa marka uu leeyahay imaha Maryama wuxuu noqon doonaa Wiilka Ilaaha ugu Sarreeya?

-Wiilka Maryama wuxuu noqon doonaa Wiilka Ilaah?

-Sidee baa Wiilka Maryama ku noqon doonaa Wiilka Ilaah?

-Miyaa Ilaah wax dhalaa?
-Maya.

-Miyaad xusuusataa in Ilaah Mid yahay, balse waa saddex shakhsi?

-Waa Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Badbaadiyaha, iyo Ilaah Ruuxa Qodduuska ah.

-Ilaaha Aabbaha ah iyo Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaa waxay dunida u soo dirayaan BAdbaadiyaha oo u imanaya sida Wiilka Ilaah iyo Wiilka Aadanaha.

-Wiilkii Maryama isna wuxuu noqon doonaa Ilaah dhan iyo qof dhan.

-Maxaa kale ee malaggu ka leeyahay wiilkii maryama, oo ah Badbaadiyaha iman Doonay?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:32b-33

32-Rabbiga Ilaaha ahuna wuxuu siin doonaa carshigii awowgiis Daa'uud.
33-Kolkii maalmihii shuqulkiisii wadaadnimadu dhammaadeen ayuu wuxuu tegey gurigiisii.

-Malaa'gita waxay leedahay wiilkii Maryama, oo ah Badbaadiyaha iman doona, wuxuu noqon doonaa mid ka soo farcami doona Boqor Daa'uud.

-Maxaa Haddaba Badbaadiyaha uu uga imanayaa faraca Daa'uud?

-Waayo Ilaah wuxuu Daa'uud ka ballanqaaday in Badbaadiyaha uu noqon doono mid ka imanaya faraciisa.

-Waayo Badbaadiyaha imanaya wuxuu noqon doonaa faracii Boqor Daa'uud, oo Ilaahna wuxuu isaga ka dhigi doonaa boqorka Israa'iil ee weligii xukumaya dunida.

-Maxay haddaba Maryama weyddiisay malagga?



Bal aynu akhrinno Luukos 1:34

34-Kolkaasaa Maryan waxay malaa'igtii ku tidhi, Sidee baa waanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan maayo.

-Maxay ahayd su'aashii Maryama?

-Maryama waxay weyddiinaysaa malagga sida ay ku suu-roobayso inay ilmo dhasho iyadoo weli bigro ah.

-Muxuu malaggu ugu jawaabay?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:35

35-Malaa'igtii waa u jawaabtay oo ku tidhi, Ruuxa Qoduuska ah ayaa kugu soo degi doona, oo xooggii Kan ugu sarreeya ayaa hoosiis kuu noqon doona, sidaas darteed kan qodduuska ah oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeedhi doonaa Wiilka Ilaah.

-Muxuu malaguu ku jawaabay?

-Malaggu wuxuu ku yiri Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaa mucjiso samayn doona, oo sidaas ayey Maryamo ku uuray-sanaysaa.

-Maryama Wiilkeeda waxay ahayd inuu dhasho iyadoo uusan Aabbe ama Hooyo ka soo farcamaynin.

-Maxaa keenay in Wiilka Maryama ay dhalayso inaanu lahayn farac Aabbe ama Hooyo?

-Waxaa taas ugu wacan in Masiixu uu dhasho isagoo aan dhaxlin

dembigii Aadan iyo Xaawo.

-Marka ay sidan tahay wuxuu dhalanayaa isagoo kaamil ah oo aan wax dembi ah lahayn.

-Waayo Wiilka Ilaah ama Ciise Masiix wuxuu u dhalanayaa sida dad isagoo weliba aan dembi lahayn, mana lahaanayo midhta ama faraca Aabbaha ama hooyada, oo iyagu suul ku leh dembi.

-Wiilka Maryama waa mid si toos ah uga soo farcamaya Ilaah oo qura.

-Maxaa kale oo malaa'gtu ku tiri Maryama.

Bal aynu akhrinno Luukos 1:36-37

36-Bal eeg, inadeertaa Elisabeetna wiil bay uuraysatay iyadoo da' weyn; oo tanuna waxay tii madhalays loogu yeedhi jiray u tahay bisheedii lixaad.
37-Waayo, wax aan Ilaah kari doonin ma jiro.

-Malaggu sidan buu ku leeyahay Maryama:

-Maaddaama Elisabeet ay ahayd qof da' weyn oo dhafay wakhtigii ay ilmo dhali lahayd, haddana Ilaah ilmo lab ah ayuu siiyey.

-Welibana Maryama si mucjiso ah ayey ilmo u dhalaysaa iyadoo bigrad ah, laakiin haddana Ilaah wuxuu iyada siiyey wiil.
Markaa Ilaah wax waliba wuu awoodaa.

-Mana jiraan wax aan Ilaah u suuroobini.



-Maxay haddaba Maryama ku jawaabtay?

Bal aynu akhrinno Luukos 1:38

38-Maryan ayaa tidhi, waa i kan, waxaan ahay addoontii Rabbiga, Sidaad u hadashay ha ii noqoto. Markaasaa malaa'igtii ka tagtay.

-Waayo Maryama waxay rumaysatay Ilaah, Ilaahna wuxuu doortay inay noqoto hooyada Ciise, oo ah Badbaadiyihii dunida iman lahaa.

-Miyaa haddaba Ciise uu noqonayaa Badbaadiyihii la ballanqaaday?

-Haa.

-Ciise wuxuu noqonayaa Badbaadiyaha Ilaah bilowgii ka ballanqaaday Aadan iyo Xaawo amrkii ay joogeen Beer Ceedan.

-Ciise wuxuu noqonayaa Badbaadiyihii Ilaah ka ballan qaaday Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, iyo dadka oo dhan.